# Dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ilmahaaga

WAA QORAAL KU SAABSAN MANHAJKA DUGSIYADA BARBAARINTA



Skolverket



## Aad ayaad muhiim u tahay

Waxaad tahay qofka ilmahaaga ugu dhow. Sidaas awgeed, ayey ra'yiyadaadu iyo talooy-inkaaga waxtar ugu leeyihiin dugsiga barbaarinta. Haddii aad noo sheegto sida wax kula yihiin, waxaa shaqaalaha u fududaanaya in ay ilmahaaga siiyaan caawimaadda uu u baahan yahay. Haddaba sida aad uga qaybqaadato oo saamayn ugu yeelato, waxaad u baahan tahay inaad ogaato habka dugsiga barbaarintu u shaqeeyo.

## Waxaa la wada leeyahay hal ujeeddo

Dowladdu waxay soo dejisay manhajka waxbarasho oo ay ku qeexan yihiin aasaaska dugsiga barbaarinta iyo hadafka iyo hawlaha dugsiga barbaarintu u xilsaaran yahay. Kolka aad akhriso manhajka waxbarashada dugsiyada barbaarinta, waxaad ogaaneysaa waxyaalaha aad ka fili karto oo aad ka dalban karto dugsiga barbaarinta.

Waxaa dugsiyo barbaarin oo dowladeed iyo kuwo gaar loo leeyahay intaba. Dugsiyada barbaarinta dowladeed waxaa mas'uul ka ah guddi siyaasadeed oo la soo doortay. Kuwa gaarka ahna waxaa mas'uulkooda leh guddiga lahaalayaasha. Dhammaan dugsiyada barbaarintu waa in ay raacaan manhajka waxbarashada.

Dugsiyada barbaarinta waxaa caadi ahaan loogu talagalay carruurta da'doodu u dhex-eyso 1 ilaa 6 sano. Dhammaan carruurta da'doodu u dhexeyso 3 ilaa 6 sano waxay san-nadkii xaq u leeyihiin 525 saac oo lacag la'aan ah ama bilaash.

# »Dugsiga barbaarinta waxay carruurta kula kulmayaan dad waaweyn oo ay u muuqdaan fursadaha ilmo walba.«

WAXAA LAGA SOO GUURIYEY MANHAJKA DUGSIYADA BARBAARINTA - FÖRSKOLANS LÄROPLAN, LPFÖ 98 (REVIDERAD 2010)



## Tallaabooyinka waxbarashada cimriga dheer

Waxaa dugsiyada barbaarinta gundhig u ah hannaanka dimoqraadiyadda. Muhiimadda weyn waxay tahay in shaqaaluhu ay abuuraan jawi furan oo dimoqraadi ah, si uu ilmo waliba u dareemo qiimihiisa iyo qiimaha dadka kale.

Hawlaha dugsiyada barbaarinta waxaa ku dheehan habka waxbaridda, halkaas oo ay xannaanada, daryeelka, barbaarinta iyo waxbariddu noqonayaan dhammaystir kaamil ah. Taas micneheedu waxa weeye in ahmiyadda kowaad ee dugsiyada barbaarintu ay tahay carruurta darteed, iyo weliba in laguu tuurtageliyo inaad bilowdo shaqo ama waxbarasho.

Waxaa manhajka waxbarshada ku qoran in ciyaartu ay muhiim u tahay koritaanka iyo waxbarashada ilmaha. Wuxuu shaqaaluhu fiiro gaar ah siinayaa aragtiyooyinka, xiiseynta iyo waaya-aragnimada ilmaha mar walba oo la qorsheynayo shaqo-maalmeedka. Waa in ilmuhu isku dayaa inuu tijaabiyo hababka loo hadlo, keli ahaan iyo isagoo la samaynaya ardayda kale, sida heesidda iyo muusigga, sawiridda, qoob-ka-cayaarka, riwaayadaha, hadaljeedinta iyo qoraalka.

Waa in ilmaha fursad loo siiyaa inuu horumariyo aqoonsigiisa dhaqan ahaaneed. Waxaa kaloo dugsiga barbaarinta muhiim ka ah horumarinta luuqadda ee ilmaha. Dugsiga barbaarintu wuxuu gacan ka geysanayaa in ilmaha ku hadla af kale oo aan iswiidhish ahayn uu fursad u helo inuu horumar ka gaaro barashada af iswiidhishka iyo afkiisa hooyo.

Dugsiga barbaarinta wuxuu ka hortegayaa dhaqamada lagu kala soocayo wiilasha iyo gabdhaha. Dhammaan gabdhaha iyo wiilashaba waa in helaan fursado isku mid ah oo aan xaddadnayn oo ay ku horumaraan.



## Dugsi barbaarin oo waliba wuxuu leeyahay qiimo gaar ah

Manhajka waxbarashadu wuxuu ballanqaadayaa in dhammaan carruurtu ay bilaabaan dugsiyo barbaarin oo isku u wada wanaagsan oo aan ku xirnayn degaanka ay ku nool yihiin. Maadaama dugsiyada barbaarinta looga dhaqmo manhajka waxbarashada, waxay leeyihiin isku hadaf qura. Laakiin waxaa dhici kara in ay ku kala geddisnaadaan habka ay u shaqeeyaan. Hawlaha dugsiga waa in la waafajiyaa carruurta.

Maamulka degmada iyo guddiga dugsiyada gaarka ah ayaa xilka ugu weyn ka saaran yahay hawlaha dugsiyada barbaarinta. Halkaas ayaadna la xiriireysaa haddii ay timaaddo dhibaato aad xallin weydeen adiga iyo shaqaalaha ama maamulaha dugsiga.

» Dugsiga barbaarintu waa inuu ilmaha ku dhiirigeliyaa in uu wax ka ogaado adduunka ku xeeran. «

WAXAA LAGA SOO GUURIYEY MANHAJKA WAXBARASHADA DUGSIYADA BARBAARINTA
FÖRSKOLANS LÄROPLAN, LPFÖ 98 (REVIDERAD 2010)





## Wadashaqaynta qoyska

Waxaa manhajka waxbarashada ku qoran in hawlaha dugsiga barbaarintu ay u dhacaan kalsooni iyo wadashaqayn dhow oo lala yeesho qoyska. Sidaas awgeed ayey muhiim u tahay in aad la hadasho shaqaalaha mar walba oo ay jiraan wax aad fekrad ka qabto. Munaasabadda ugu habbooni waxa weeye marka ilmaha la geynayo ama laga soo wadayo dugsiga. Kolkaas oo uu shaqaaluhu kaaga xogwarramayo sida uu ilmahaagu dugsiga ku ahaa maalintaas. Waxaad adiguna uga warrami kartaa haddii ay jiraan arrimo gaar ah oo ay habboon tahay in shaqaaluhu wax ka ogaado.

Wuxuu shaqaaluhu kulanka wadahadalka horumarka ilmaha oo aad uga xaajooneysaan sida uu ilmahaagu uga helay iyo horumarka uu gaaray iyo sida uu dugsiga barbaarintu u shaqeeyo. Waxaa wadahadaladaas lala kaashanayaa manhajka waxbarashada.

» Dugsiga barbaarintu waa inuu ilmaha ku dhiirigeliyaa in uu wax ka ogaado adduunka ku xeeran.«

WAXAA LAGA SOO GUURIYEY MANHAJKA WAXBARASHADA DUGSIYADA BARBAARINTA
FÖRSKOLANS LÄROPLAN, LPFÖ 98 (REVIDERAD 2010)

## Ma dooneysaa inaad akhriso gebi ahaan manhajka waxbarashada?

Manhajka waxbarashadu wuxuu yaal dhammaan dugsiyada barbaarinta. Waxaad ka dlban kartaa ama ka soo guurin kartaa bogga internet-ka ee Skolverkets webbplats www.skolverket.se.

**ISBN 978-91-87115-20-2**
**Grafisk form: AB Typoform**
**Omslagsfoto: Maskot**
**Foto inlaga: s 2 NordicPhotos, s 3 Kzenon/Shutterstock,**
**s 4 Yulya Shilova/Shutterstock, s 5 Michael McLain, s 6 NordicPhotos**
**Skolverket 2011**

Skolverket